

**Muhiim: Fadlan akhri xaashidan kuna soo celi bogga ugu dembeeya xafiiska dugsiga maalinta  
Talaatada 1<sup>da</sup> Maajo 2018**

Waxaan u baahan nahay inaan ku hayno war-gelinta shakhsiyeed ee ilmahaaga habka Kombuyutarka iyo mid waraaqo qoraal ah si uu nooga caawiyo baahida waxbarashadda.

Maamulaha dugsiga ayaa masuul ka ah isticmaalida iyo xafidoodaba. Fadlan nagu caawi inaan hayno war-gelimaha cusub ee ilmahaaga adiga oo na soo war-gelinaya wixii is-bedel ah.

Shaqaalahu dugsigu waxay u isticmaali karaan war-gelinta ilmahaaga si ay suurto-gal uga dhigto in ay gutaan shaqadooda. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in lala wadaago kuwo kale oo ku lug leh daryeelka ilmahaaga, haddii ay noqoto lagama maarmaan. Cid kasta oo isticmaasha war-gelinta ilmahaaga si habsami ah ayaa loogu tababaray wixii la xidhiidha xafidaada waana qaynuun waajib ah in si sugar, oo sax ah una dhameystiran loo xafido faafaahintooda.

Dhammaan wixii war-gelineed ah ee ilmahaaga aad ayaa loo xafidaa si haboon waxaana laga dhowraa in ayna lumin.

Duruufo gaar ahaaneed awgood waxaa laga yaabaa in nala weydiisto sharci ahaan in aan siino faafaahinta ilmahaaga Hay'addo ama xafiisyo dawladeed, tusaalle ahaan haddii uu jiro amar maxkamadeed, ama haddii ay jirto arrimo waxbarasho ah oo khuseeya dan guud. Xaaladaha kale waxaa laga yaabaa in aad bixiso qoraal ogolaansho ah inta aan la bixin war-gelinta ka hor.

Si loo xaqiijiyo ilmahaaga dhowrnaantiisa (child's privacy), kuma bixin doono wax war-gelin khadka tilifoona, Fax am khadka email ka iyada oo aanu adiga –waalidka/daryeelahaa la hadlayno mooyaane. Wixii war-gelineed ah lama siin karo cid ka mid ah qoyska and saaxiibada iyada oo aan hayso qoraal ogolaansho ah ka hor mooyaane umana dhiibi karno wixii fariimo ah cid kale.

### **Maxaan u keydinaa una isticmaalnaa war-gelimaha ardayga?**

Waxaanu u keydinaa una isticmaalnaa war-gelineedka ardayga iyada oo la raacayo qodob-hooseedka 537A ee Xeerka Waxbarashadda (Education Act) 1996, iyo qodob-hooseedka 83 Xeerka Carruurta (Children Act) 1989. Waxaa kale oo aan fulinaa Xeerarka (Article 6(1)(c) and Article 9(2)(b) ) ee DHowrista War-gelimaha Guud (General Data Protection Regulation (GDPR).

### **Waxaan u isticmaalnaa war-gelinta ardayga:**

- in lagu caawiyo waxbarashadda ardayga
- in lala socdo lagana warbixiyo horumarka ardayga
- in la siin karo daryeelka ugu haboon
- in aanu qiimeyn karno tayadda adeegyada aan bixino
- in aan fulino qaynuunada khuseeya wadaagista war-gelimaha
- in aan kugu gacan-siino sidii aan u go'aan u gaadhi kartid markii aad dugsiga dhameysato

### **Noocyada war-gelinta ardayda ee aan ururino, hayno lana wadaagno waxay iskugu jiraan:**

- War-gelin shakhsiyeed (sida magaca, tirsiga khaas ahaaneed ee ardayga iyo faafaahinta la xidhiidha)
- Faafaahinta (sida sinjiyadda(hayb-raaca), luqadda, dhalashadda (wadanka loo dhashay) iyo xaq-u-yeelashada cuntada dugsiga ee lacag la'aanta ah)

- War-gelinta Imaanshaha (sida casharadda la dhigtay,tiradda maqnaanshaha iyo sababaha maqnaanshaha)
- Natiijooyinka Qiimeynta Minhaajka Qaranka (imtixaanaadka)
- War-gelinta Baahiyaha Waxbarashadda Gaar ahaaneed
- War-gelimaha caafimaadka ee muhiimka ah

### **Ururinta war-gelinta ardayda**

Maadaama inta badan ee war-gelinta ardayda ee aad na siiso anaka ay tahay mid sharci ah, qaar ka mid ahina ay yihiin kuwo aad raali ahaan nagu siisid. Si aanu u raacno guud ahaan xeerarka Dhowrista War-gelimaha, waanu ku soo wargelin doonaa in ay tahay mid sharci ahaan ah in aad na soo siiso ama in ay tahay mid aad adigu leedahay doorashadeeda arrintaasi.

### **Keydinta war-gelimaha ardayda**

Dugsigu wuxuu u keydiyaa habab kale duwan sida Kombuyutarka iyo waraaqo qoraalo ah oo ay tahay mid mudaysan inta aan hayn karno mid kasta. Haddii aad u baahato warar dheeraad ah oo ku saabsan hababkaasi, fadlan la soo xidhiidh madaxa Dhowrista War-gelimaha ee dugsiga. Mudada ugu dheer ee aanu hayn karno war-gelimaha ilmahaaga waxay tahay ilaa inta ilmahaagu ka gaadhayo 25 sano jir, markaasi oo ay tahay in dhammaan wixii war-gelineed ahaan laga tirtirayo hab-dugsiyeedka.

### **La Wadaagista War-gelimaha**

Waxaa jira xadidaad adag ciddii arki karta war-gelimahaaga. Lama wadaagi doono war-gelimahaaga haddii aad nogu soo war-geliso in aadan rabin inaan cid la wadaagno haddii ayna ahayn sida qudhaha ah ee aanu kugu badbaadin karno una caafimaad qabi kartid ama aan qaynuun ahaan aan nalagu soo weydiisan in aan sidaa yeelno. Lama wadaagno wax war-gelimaha ilmahaaga cidna ogolaansho la'aan iyada oo uu qaynuun ogol yahay mooyaane ama ayna siyaasadaha jaan-goynta dugsigu noo ogolaan.

Waxaanu si caadi ah ula wadaagnaa war-gelimaha ardayga:

- Dugsiyada ama machadyaada (colleges) ay ardaydu aadaan kadib markii ay gudsiga dhameystaan
- Golaha Deegaanka (local authority) iyo kuwa ay siiyan adeegyo ay u fulinayaan Golaha Deegaanka
- Wasaaradda Waxbarashadda (Department for Education (DfE)
- War-gelimayahaga waxaa lagu keydiyaa habab kala duwan oo gacan-sedexaad ay gaadhi karaan, waanu hubinnaa cid kastaba in ay xaqijiyaan kuna dhaqmaan Xeerarka Guud ee Dhowrista War-gelimaha, iyo in ayna gaadhi ama isticmaalin war-gelimaha ilmaha ka hor inta aan wax ogolaansho ah lagaa helin adiga.

Waxaan la wadaagnaa Wasaaradda Waxbarashadda ardayda war-gelimahooda oo qaynuun ku saleysan. Wadaagistani waxay ku saleysan tahay helista miisaaniyada dugsiga iyo jaan-goynta kobcinta natiijooyinka waxbarashadda iyo qiimeynta tayadeedaba.

Si aad warar dheeraad ah u ogaato ururinta war-gelimaha wasaaradda Waxbarashaddu naga dalbato ( sida tusaalle ahaan; tiro-koobka dusgsiga (school census) fiiri khadka: <https://www.gov.uk/education/data-collection-andcensuses-for-schools>

Waxaa nalooga baahan yahay in aan la wadaagno Wasaaradda Waxbarashadda war-gelimaha ardayda dugsiga si ku cad xeerka dugsiyada (regulation 5 of The Education (Information about Individual Pupils) (England) Regulations 2013.

### **Codsashada helitaanka War-gelimaha shakhsiyeed**

Sida ku cad Xeerarka Guud ee Dhowrista War-gelinta (General Data Protection Regulations), waalidiinta iyo ardaydu waxay xaq u leeyihii in ay codsadaan helitaanka war-gelinta ilmaha dugsigu ka hayo. Si aad u sameyso codsi war-gelintaada shakhsiyeeda, ama laguugu ogolaado keydka qoraaladda waxbarashadda ilmahaaga, fadlan la xidhiidh madaxa Dhowrista War-gelimaha si toos ah, oo kuugu diyaarin doona in ay dhacdo taasi muddo ku haboon sida uu qaynuunku qabo.

#### **Waxaa kale oo aad xaq u leedahay :**

- In aad diido in la sameeyo war-gelinta shakhsiyeed ee keeni karta ama sababi karta waxyeelo ama murugo (distress)
- In aad diido in loo isticmaalo ujeeddo suuq-geyn toos ah (direct marketing)
- In aad diido go'aaminta isaga dhici karta iskeeda (automated means)
- In duruufo gaar ahaaneed, in la saxo war-gelin qaldan, la joojiyo, la tirtiro ama la baabi'yo iyo
- In aad dalban karto mag-dhaw wixii dhibaato ka yimid ee ay sababtay oofin la'aanta Xeerarka Dhowrista Guud ee Dhowrista War-gelimaha

### **War-gelinta Waalidka / Daryeelaha**

Waxaa kale oo dugsigu ku keydin doonaa war-gelimaha asaasiga ah sida magaca, xidhiidhka ka dhexeeya (relationship) iyo faafaahinta dhammaan waalidiinta /daryeelayasha habka dugsiga si aanu idinla soo xidhiidhin karno, una ilaalino amaanka caruurteena. Waan hayn doonaa war-gelimahan intii muddo ah oo ilmahaagu ku jiro dugsiga. War-gelintani waxaa kale oo khuseeya shuruudaha aanu kor ku soo xusanay ogeysiiskan.

### **Madaxa Dhowrista War-gelimaha**

Dugsigu wuxuu leeyahay sarkaal madax-bannaan oo masuul ka ah dhowrista war-gelimaha adeegga ay bixiyaan Hay'adda Dhowrista Adduunka (Global Policing Limited). Hay'adda Dhowrista Adduunka waxaa masuul ka ah madax hore oo sare oo ka tirsanann jiray sarakiisha Booliska oo khibrad dheer u leh la shaqeynta dugsiyada lehna waayo-aragnimo aad u qoto dheer arrimaha dhowrista war-gelimaha. Haddii aad wax su'aallo ah ama faallo, ama aad rabtid in aad sameyso codsi ku saleysan qaynuunka, waa in aad toos iyaga kala xidhiidho:

- Tilifoonka (jawaab-qabte/answerphone) 0161 212 1681
- Email [datarequests@globalpolicing.co.uk](mailto:datarequests@globalpolicing.co.uk)
- Website [www.globalpolicing.co.uk/data](http://www.globalpolicing.co.uk/data)

Haddii aad wax walaac ah ka qabto sida aan u ururino ama aan u isticmaalno war-gelimaha shakhsiyeed, waxaan idinka codsanaynaa in aad na weydiisaan wixii walaaciin ah sida ugu dkakhsaha badan leh. Haddii ayna sidaasi ahayn, waxaad la xidhiidhi kartaan xafiiska Hogaanka war-gelimaha (Commissioner's Office at <https://ico.org.uk/concerns>)

## **General Data Protection Regulations (GDPR)**

**Consent – This must be signed by a parent or carer and returned back to the school office**

**You must read the information supplied above and return this signed document to the school prior to the Tuesday 1<sup>st</sup> May 2018.**

I am the parent / carer of:

Class:

**Please note:** If you have more than **one** child in school, please complete **one sheet per child**

### **Specific Additions (please tick the boxes as appropriate):**

- I give permission to the school to use / take photographs of my child, and for these to be displayed in the school with the name of the child, and for use on school materials aimed at the school community, for example prospectus and newsletters
- I give permission for my child's medical information, including allergies to be displayed within the school, which will include the child's name and picture to ensure that all staff are aware of any specific medical needs.
- I give permission for the school to use / take photographs of my child to for school for the website / Twitter account.
- I give permission for the school to allow photographs / video footage to be taken of my child for use in the media / press coverage of the school

**Parent / Carer Name**

**Signed**

**Date**

**Please tick the boxes below to confirm you have read and understood this document**

- I understand that as the parent / carer, I have the right to give the school permission to hold and use information about me and the children named above.
- I also have been made aware of my rights within the General Data Protection Regulations and how I can contact the data protection officers.

*Please note that this form will be stored either electronically or a paper copy will be saved and retained until your child leaves the school.*